

Jaamacadda Jigjiga oo diiwaangalisay 2,790 arday cusub

Jigjiga, 14-Dec-2011 - Jaamacadda Jigjiga University ayaa sanadkan diiwaangalisay 2,790 arday oo cusub, kuwaasoo ku dhawaad kala-badh ay ka soo jeedaan deegaanka Soomaalida, halka inta kale ay ka yimaadeen deegaannada kale ee dalka.

Sida uu warbaahinta dalka u sheegay Madaxweynaha jaamacadda, Dr. Cabdinasir Axmed, Jaamacaddu waxey ardaydan diiwaangalisay kadib dhameystirka howl lagu ballaadinayey jaamacadda, taasoo ku kacday lacag ka badan 200 milyan oo birr.

Dr. Cabdinasir ayaa tibaaxay in howsha ballaadhinta jaamacadda ay kamid ahaayeen qololka wax lagu barto, kuwa jiifka, hoolka cuntada, maktabad iyo maqsin farsamo.

Jaamacadda Jigjiga oo ah mid si wanaagsan u dhisan ayaa aad u sii ballaadhanneysa marba marka ka daneysa, taasoo keentay inay sanad kasta sii korodho tirada ardayda ay diiwaangaliso jaamacadda.

Ardayda ka soo jeedda deegaanka ee ay jaamacadda diiwaangalisay sanadkan ayaa xaflad soo dhaweyn ah loogu sameeyey Hoolka Shirarka ee Sayid Maxamed Cabdille Xassan, halkaasoo ay kula hadleen masuuliyiin ka kala katirsan xukumadda iyo xisbiga ESPDP.

Sida uu sheegay Dr. Cabdinasir, Jaamacadda Jigjiga waxey tababaro kala duwan u fidisay in-ka-badan 14,940 arday tan iyo markii albaabada loo furay.